

## App-ka si loo baaro summadda QR ee tallaalka COVID-19 hadda waa la heli karaa

Oktoobar 12, 2021

App-ka xaqiijinta ee ay dowladdu taageerto si loo hubiyo caddeynta tallaalka oo leh summadda QR ayaa hadda diyaar u ah soo dejinta.

Ganacsiyada iyo ururadu waxay bilaabi karaan adeegsiga barnaamijka app-ka Hubinta Rikoorada Covid (AB Covid Records Verifier app) oo lacag la'aan ah si ay si dhaqso leh oo fudud ugu xaqiijiyaan xaaladda tallaalka ee macaamilayaashooda. Barnaamijka app-ka Hubinta Rikoorada Covid ayaa diyaar u ah in laga soo degsado iyada oo la isticmaalayo aaladaha [Apple](#) iyo [Android](#) oo laga helayo dukaamada app -ka.

Reer Alberta waxay heli karaan diiwaankooda tallaalka oo la xoojiyay iyagoo isticmaalaya summadda QR iyaga oo geleya internetka [alberta.ca/CovidRecords](https://alberta.ca/CovidRecords) iyagoon samaysan koonto.

Marka la baaro summad QR oo sax ah, calaamad xaqiijin ah oo cagaaran ayaa soo baxaysa taas oo xaqiijineysa caddaynta tallaalka. Waxay kaloo soo bandhigi doontaa magaca qofka iyo taariikhda dhalashada, taas oo ganacsiyada laga codsanayo inay ka hubiyaan aqoonsiyo kale. App -ku ma kaydiyo wax macluumaad shakhsi ah umana baahna xiriir internet inuu ku shaqeeyo marka la soo dejiyo.

Summadda QR waxaa ku jira saxeexa internetka oo sugan oo xaqiijinaya inay bixisay hay'adda Caafimaadka ee Alberta ayna aad u adag tahay in laga been sheego. Isla tiknoolojiyaddaas ayaa loo adeegsadaa macaamil ganacsi sugan ee nidaamka bangiyada iyo warshadaha kale. Haddii qofku aanu buuxin shuruudaha tallaalka oo ay ku jirto Barnaamijka Ka -dhaafitaanka Xaddidaada ama haddii summadda QR la faro -geliyo, rikoorka ayaa u muuqan doona mid aan sax ahayn marka la baaro.

Reer Alberta waxay codsan karaan caddeyn qoral ah ee tallaalka oo leh summadda QR ee xafiiska wakiilka diiwaangelinta deegaanka ama iyagoo wacaya 811, lacag la'aan. Noocyada kale ee

### Macluumaadka la xiriira

[Alberta.ca/CovidRecords](https://alberta.ca/CovidRecords)

[Alberta.ca/Vaccine](https://alberta.ca/Vaccine)

[COVID-19 public health actions](#)

[COVID-19 information](#)

### Weydiimaha warbaahinta

Steve Buick  
780-288-1735  
Xoghayaha Sare ee Saxaafadda,  
Caafimaadka

caddaynta tallaalka waa la sii aqbali doonaa ilaa Noofambar 15, oo ay ku jiraan diiwaannada warqadaha ee bixiyayaasha tallaalka ama shahaadada, ama rikoorka laga daabacay [alberta.ca/CovidRecords](https://alberta.ca/CovidRecords) ama MyHealthRecords.

## Xaqiiqooyin degdeg ah

- Ganacsiyada waxaa laga codsanayaa inay hubiyaan aqoonsi sax ah oo u dhigma diiwaanka tallaalka ee dadka da'adoodu ka weyn tahay 18 sano oo haysta nooc kasta oo caddayn tallaalka ah.
- Summadaha QR waa in aan lagu wadaagin baraha bulshada ee internetka maadaama ay muujinayaan taariikhda dhalashada iyo magaca buuxa ee qofka, marka lagu daro xaqiijinta caddaynta tallaalka, marka la iska baarayo. Summadda QR kuma jirto wax kale oo caafimaad ama macluumaad shaqsiyeed ee gaar ah.
- Abuuritaanka ama adeegsiga rikoorka tallaalka been been ah waa dembi lagu soo oogayo dacwad iyo/ama ganaaxyo gaaraya \$ 100,000 dambiga ugu horreeya.
- Haddii ay jiraan arrimo ka hortegaya baariista summadda QR ee taleefankaaga, ku dhaji summadda oo kordhi iftiinka. Summadda QR si fiican uma baari kartid haddii cabirka daabacaadda la yareeyo ama nuqulka warqaddu uu laalaaban yahay. Ha isku laabin nuqul warqad ah ee summadda QR.
- Reer Alberta, oo ay ku jiraan carruurta 12 sano jir ah ama ka weyn, waxay u baahnaa doonaan inay geliyaan bisha iyo sannadka tallaalka qiyaas kasta, Lambarka Caafimaadka Shakhsi ahaaneed ee Alberta iyo taariikhda dhalashada si ay u helaan caddayntooda tallaalka iyagoo wata summadda QR shabakadda [alberta.ca/CovidRecords](https://alberta.ca/CovidRecords).
- Qof kasta oo xog ka maqantahay ama ka khaldantahay oo ku jira diiwaanka tallaalkooda ama ay dhibaato ka haysato helitaanka, wuxuu aadi karaa [alberta.ca/CovidRecordsHelp](https://alberta.ca/CovidRecordsHelp).
- Ganacsatada la kulma arrimaha appka waxay kala xiriiri karaan khadka taageerada 1-888-527-1224 ama iimayl u dir [covid19record@gov.ab.ca](mailto:covid19record@gov.ab.ca).